

# Waa maxay si gaar ah ilmo u korin?

Haddii uu ilmo la degan yahay, daryeelna ka helo qof aysan xigto aheyn, diyaarintaas waxaa loo yaqaanaa si gaar ah ilmo u korin.

Tan sababo badan baa dhalin kara waqtii dheer ama mid gaabanba way ahaan kartaa.

Laga yaabaa inay waalidka ilmaha jiran yihiin, ama ay jirtey dhibaato gudaha qoyska ka taagan. Habkan wuu haboonaan karaa marka ay waalidiinta wadanka dibedda ka degan yihiin.



## Kuwa lala xiriirayo

Nala soo xiriir oo waxa aan kuu sheegi karnaa waxa xigga ee la sameynayo. Haddii aad u baahan tahay, waxa aan diyaarin karnaa macluumaad luqado kale ku baxa. Haddii aad degan tahay:

Leicester  
Wac 0116 454 1004

Leicestershire  
Wac 0116 305 0005

Rutland  
Wac 01572 758407

**Safeguarding Children Board  
Leicestershire and Rutland**  
[www.lrsb.org.uk](http://www.lrsb.org.uk)

**Safeguarding Children Board  
Leicester**  
[www.lcitylscb.org](http://www.lcitylscb.org)



**Wargelin daryeeleyaasha  
loogu tallogalay**

SOMALI

# Xaalada nagala hadal

Haddii aad korineyo qof kale ilmihiisa, ama aad ogtahay qof sidaas sameynaya waa inaad la hadashaa Adeegyada Carruurta ee dowlada hoose ee goobtaada.

Halkii looga baahdo taageero ayaa la bixin karaa.

Shaqaalaha bulshada ee waayo-arragga ah waxa ay fahmayaan xaaladaha kala duwan ee adkaan kara ee si gaar ah ilmo u korinta ka dhalato. Waxaa kale oo ay yaqaanaan sharci (Xeerka Carruurta ee 1989) ee lagu hubiyo in ay carruurta oo dhan si amaan ah oo wanaagsan loo daryeelo.

“Sue, oo Shaqaale bulshada ah waa ay fiicneyd”

“Waa aan ku nafisney wax walba soo bandhigidda iyo ogaanta inaan si wacan wax u sameyno”

## Taageerada aan bixino waa noocmaa

Adeegyada Carruurta waxa ay hayaan koox waayo-arrag ah oo bixin kara tallo iyo qof aad adiga iyo ilmaha la xiriirtaan.

Qof shaqaale bulsho ah baa adiga iyo ilmaha toddobaad gudiiisa idinku soo booqan doona laga bilaabo goorta Kownsalka arrinta loo soo sheegey. Ka dibna lixdii toddobaadba mar ayey idin soo booqan doonaan muddada sanadka hore ah, ka dibna 12-kii toddobaadba mar. Qofka shaqaalaha bulshada ah waa mid ay ilmaha ama daryeelaha la soo xiriiri karaan goor kasta haddii ay doonaan in ay wax kala hadlaan.

Qofka shaqaalaha bulshada waxa uu tallo ka bixin karaa:

- korriimada xagga niyadda ah
- waxbarashada
- daryeelka caafimaadka
- diyaarinta maaliyada iyo kaalmada
- waajibaadyada qaunuuniga ah.

## Waa maxay diyaarinta si gaar ah ilmo u korin?

Ilmo si gaar ah loo koriyo waa ilmo 16 sano jir ka yar (ama 18 sano jir ka yar haddii uu ilmaha wax laxaad li'i ah qabo) kaas oo qof kale oo daryeela la nool.

Daryeelaha waa qof aan:

- ilmaha waalid u aheyn, ama qof kale oo aan mas'uuliyad waalidnimo ilmaha ka saarneyn
  - aheyna xigto dhow side awoowe/ayeyo, eedo/adeer ay aabaha/hooyada ilmaha isqabaan/isqabeen, wiil ama gabar walaal u ah, adeer/abti ama eedo/habar-yar.
- Qofka xigtada ah waxa uu ahaan karaa mid si buuxda ay laxmi ahaan isku xigaan, mid ay nus-laxmi ahaan isku xigaan ama mid guur ku yimid.

Waa diyaarinta daryeel la doonayo in uu sii socdo waqtii ka badan 27 maalin.

“Sue baa aniga iyo Ayesha Hoyadeed nagu caawintey dejinta heshiis quoraal ah si ay wax walba u noqdaan sharci iyo amaan”